

# Qalliin lagu sameeyo suuxdin




## Buugyarahaa oo si fudud loo akhrin karo

Qalliinku wuxuu noqon karaa mid cabsidiisa leh, laakiin waxaa jira waxyaabo aad samayn karto si ay kaaga caawiyaan si uu walwalka kaaga yaraado.

Buugyarahaa wuxuu sharxayaa ereyada qaarkood oo kugu adkaan karo.

Waxaa kale oo uu kuu sheegayaa waxa aad filan karto iyo sida aad ugu diyaargarowi karto qalliinka.

Waxaan rajeyneynaa inaad u aragto mid waxtar leh.



## Waa maxay micnaha erayada adag

### Daawada suuxinta

(**Anaesthesia**) waxaa loogu dhawaaqaa 'An-ess-thee-zee-a' waxa ay kuu seexineysaa qalliinka.

### Daawooyinka suuxinta guud

(waxaa loogu dhawaaqaa 'An-ess-the-tics') waa daawooyin ku seexiyo si aad ugu raaxaysato inta lagu jiro qalliinka.

### Rugta qiimaynta ka hor

**qalliinkakiliniga** ku yaalo isbitaalka halkaas oo kalkaaliyaha caafimaadka ku waydiin doono su'aalo ku saabsan caafimaadkaaga. Waxa kale oo aad la kulmi kartaa dhakhtarka suuxiyaha si aad ugala hadasho qorshaha suuxinta.

### Cannula

(waxaa loogu dhawaaqaa 'kan-yuu-la') Kaanool tuubo caag ah oo dhuuban oo takhtar ama kalkaaliye caafimaad ay gelin doonaan gadaasha gacantaada si ay kuu siiyaan daawooyin ama dareere.



## Yaa kugu ilaalin doona isbitaalka

Waxaad kula kulmi doontaa dad badan isbitaalka. Waxaa laga yaabaa in aad la yaabto cida ay yihiin iyo waxa ay qabtaan.

**Dhakhtarka suuxinta** waxaa loogu dhawaaqaa 'an-ees-th-tist' dhakhtar u tabobaran bixinta dawooinka hurdada inta lagu jiro qalliinka.

**Dhakhtarka qalliinka** (waxaa loogu dhawaaqaa 'sir-john') waa dhakhtarka qalliinka samayn doona.



### Kalkaalisada/kalkaaliyagha

– isbitaalka waxa mar kasta joogi doona kalkaaliyayaal si ay u caawiyaan adiga iyo dhakhaatiirta. Haddii aad wax welwel ah aad qabto waxaad la hadli kartaa dhakhtarka ama kalkaalisada/kalkaaliyaha.

**Kooxda suuxinta** – dhakhtarka suuxiyaha iyo shaqaalahi kale ee isbitaalka aya ku ilaalin doona qalliinka ka hor, inta lagu jiro iyo ka diba.

Qof ku daryeela ayaa kula imaan kara isbitaalka.



## U diyaargarowga qalliinka

Haddii aad taam tahay oo aad caafimaad qabto qalliinka ka hor, si dhakhso leh ayaad u bogsan doontaa oo dhib yar.

Haddii aad sigaar cabto, khamri cabto, ama aad qaadato daroogo sharci darro ah, waa in aad joojisaa ama aad isku daydaa in aad iska jarto qalliinka ka hor. Dhakhtarkaaga guud ayaa kuu sheegi kara meesha aad ka heli karto caawimaad.

Haddii aad miisaan culus tahay, waa inaad isku daydaa inaad lumiso xoogaa miisaan ah oo aad cunto raashiin caafimaad leh. Dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegi kara meesha aad ka heli karto caawimo.

## qalliin lagu suuxinayo |buug yaraha oo si fudud loo akhriyi karo qalliin



Socodka iyo isticmaalka jaranjarooyinka waa jimicsi wanaagsan si ay kaaga caawiyaan in aad taam u noqoto qalliinka.



Kala hadal dhakhtarkaaga guud wixii dhibaato caafimaad kugu haya, sida xanuunka Sokoroow ama macaan ama neefta, ka hor inta aanad tagin isbitaalka qalliinka. Dhakhtarkaagu wuxuu hubin doonaa inaad qaadatid daawooyinka saxda ah.



Haddii aad leedahay ilko liqliqanaya, booqo dhakhtarkaaga ilkaha si aad u hagaajiso ka hor qalliinka. Ilkaha dabacsan ayaa soo bixi kara marka qalliinka lagu jiro.

## qalliin lagu suuxinayo |buug yaraha oo si fudud loo akhriyi karo qalliin




Waxaa laga yaabaa in ay adkaato in la dhaqaaqo oo si caadi ah loo baxo qalliinka ka dib.



Weydii qoyskaaga, saaxiibbadaa ama daryeelahaaga inay hubiyaan inaad cunto raashiin kugu filan iyo in aad ka heysato dawooyinkaga caadiga ah in kugu filan markaad guriga timaado.



Waa caadi in la dareemo daal badan qalliinka ka dib. Weydii daryeelayaashaada iyo qoyskaaga inay ku ag joogaan oo ku caawiyaan markaad gurigaaga ku soo noqoto.



## Kahor qalliiinka isbitaalka

Isbitaalku wuxuu kuu soo diri doonaa taariikhda iyo wakhti aad kula kulanto kalkaalisada ama dhakhtarka suuxinta ee xarunta qiimaynta ee isbitaalka si aad ugala hadasho qalliiinka.

Daryeelahaaga ama xubin qoyskaaga ah ayaa ku raaci kara.

Dhakhtarka ama kalkaalisada ayaa ku weydiin doona su'aalo ku saabsan caafimaadkaaga iyo daawooyinka aad qaadato. **Keen dhammaan daawooyinkaaga caadiga ah ayaga oo ku jira baakadooda (ama soo qor magacyadooda) kulanka ballanta.**




U sheeg wixii xasaasiyad ah oo aad qabtid.



Waxa kale oo laga yaabaa inay kuu habeeyaan baadhitaano ka hor qalliinka si loo hubiyo inuu si badqab ah ku socon karo qalliinka.



Dadku waxay inta badan dareemaan walwal ka hor qalliinka. Adiga iyo daryeelahaaga waxaad kooxda weydiin kartaan wixii su'aalo ah ee aad ka qabtan qalliinka ama suuxinta. Waxay kuu sharxi karaan waxyaabaha aad waydiiso waxayna ku siin karaan caawimo.




## Maalinta qalliinka

Qubeysa ka hor inta aadan isbitaalka tagin. Maqaarka nadiifta ah waxaa yar in uu caabuq qaado.

**Haxidhinin**ama ha u qaadid isbitaalka mid ka midahkuwan:

- ✗ Dahab
- ✗ waji-qurxinta ama kareemka
- ✗ Dawada ciddiyaha lamariiyo
- ✗ waxyaabo kale oo qiimaha leh
- ✗ lacag aad uu badan.



### Uqaadowaxyaabahan isbitaalka:


- ✓ Ookiyaalahaaga, ilkahaaga macmalka ah, aalada maqalka iyo baytarigeeda badalka ah, sanduuq ay ku jiraan waxyaabahan waa mid faa'ido leh
- ✓ Daawooyinkaaga caadiga ah Kooxdoo waxay kuu sheegi doontaa haddii aad u baahan tahay inaad joojiso qaadashada mid ka mid ah
- ✓ wax la sameeyo maalinta qalliinka, sida muusiga (oo leh sameecadaha dhegaha si aadan u dhibin bukaanada kale), wax aad akhrido ama ciyaarida geem si aad ugu nasato
- ✓ wax diiran iyo wax raaxo leh oo la xidho hadiiqabow jiro, iyo waxyaalaha lagu dhadhaqdo.




Isbitaalku ayaa kuu sheegi doona markaad u baahan tahay inaad cuntada joojiso.



Taas macnaheedu waa in aan la cunin nacnac, xanjo ama caano. Haddii ay cunto calooshaada ku jirto xilliga qalliinka, waxay keeni kartaa khatar.



Waa inaad sii wadaa cabbitaanka biyaha ilaa ay kalkaalisadu ku dhahdo jooji, si aadan harraad badan u dareemin markaad soo kacdo.



Isbitaalku waxa uu ku siin doonaa dharka isbitaalka si aad ugu dharkaaga beddesho iyo gunti aad gacantaada ku xidhato oo magacaagu ku dul qoran yahay.

## qalliin lagu suuxinayo |buug yaraha oo si fudud loo akhriyi karo qalliin




Marka la gaadho wakhtiga qalliinka, kalkaalisaada ayaa ku geyn doonta Qolka qalliinka.


Daryeelahaaga ama kalkaalisaada ayaa loo ogolaan karaa inay ku raacaan.



Kooxdu waxay ku samayn doontaa dhawr baaritan oo dheeraad ah waxayna eegi doonaan tafaasiisha guntinkaaga gacanta. Waxay ku weydiin doonaan su'aalo si ay u hubiyaan in dhammaan ay sax yihiin oo aad ogolaatay in qaliinka lagugu sameeyo. Waxaa lagu weydiin doonaa inaad saxiixdo Warqadda ogolaanshaha.



Dhakhtarka suuxiya sida caadiga ah waxa uu gelin doonaa gacantaada dhabarkeeda tuubo yar oo caag ah (Kaanool) si uu kuu siiyo dhamaan daawooyinka aad u baahantahay ina lagu jiro qalliinka. Mararka qaarkood dhakhtarka suuxinta ayaa isticmaali doona kareem si ay u noqoto mid aan xanuun laheen.





Mararka qaarkood waxaad ku neefsan kartaa gaas hawo si aad u seexato beddelkeeda.



Markaad seexato, dhakhtarka suuxinta ayaa kula joogi doona ilaa aad kasoo kacdo.



## Qalliinka kadib iyo aadida guriga

Qalliinka ka dib waxaa lagu geyn doonaa qol u dhow Waarka-qalliinka ilaa aad noqoto mid si buuxa oo caadi u soo jeedo. Kalkaaliyaal ayaa kula joogi doona halkaas.

Waxay sidoo kale awood u yeelan doonaan inay ku siiyan daawooyin haddii loo baahdo si aad udareento raaxo.

Marka ay ku faraxsan yihiin inaad si fiican u soo kabanayso, waxay ku geyn doonaan qaybta bukaanada.

Inta aad ku jirto qaybta bukaanada waxaad bilaabi kartaa cabbitaanka iyo wax cunida mar kale. Halkan shaqaaluhu waxay sidoo kale kaa bilaabi doonaan inay kuu diyaariyaan inaad ka baxdo isbitaalka.

Shaqaaluhu waxay kaala hadli doonaan adiga iyo daryeelahaaga xanuun baabi'iyaha aad u baahan doonto inaad ku qaadato guriga.

Waxay kuu sheegi doonaan inta aad qaadanayso iyo inta jeer.



Hubi in adiga iyo daryeelahaaga aad taqaaniin qofka aad wacaysaan haddii ay jiraan wax dhibaato ah marka aad guriga ku soo noqoto. Shaqaaluhu waxay ku siin doonaan lambarka aad wacayso ka hor intaadan ka bixin isbitaalka.



Waa in daryeelahaaga guriga ku geeyaa. Waa inay kula joogaan had iyo jeer maalinta iyo habeenka ugu horreeya ka dib markaad guriga ku soo noqoto.



Isdaji dhawr maalmood ka dib qalliinka. Si taxadar leh u raac tilmaamaha iyo jimicsiga uu isbitaalku ku siiyo.



Haddii aad dareento caafimaad darro ama aad dareento kulayl iyo dhidid, weydii daryeelahaaga inuu waco isbitaalka ama uu kuu celiyo isbitaalka.

Haddii aad wax welwel ah ka qabto dhaawacaaga la xiriir dhakhtarkaaga guud ama isbitaalka.

Raac tilmaamo kasta oo lagaa siiyo goorta aad dib u bilaabi doonto wadida baabuurka.

Nasiib wacan qalliinkaaga!

Ha iloobin in aad waydiiso shaqaalaha haddii aad wax su'aalo ah qabtid ama haddii ay jiraan wax aan caddayn. Waxay u joogaan inay ku caawiyaan.

## Afeef

Waxaan aad ugu dadaalaynaa in macluumaadka ku jira qoraalkan yar ay noqdaan kuwo sax ah oo ilaa hadda, laakiin annagu ma ballan qaadi karno tan. Uma fileynno macluumaadkan guud inuu daboolayo dhammaan su'aalaha aad qabtid ama waxkasta oo aad kuugu muhiim kuu ah. Waa inaad kala hadasho xulashooyinkaaga iyo wixii walwal ah ee aad ka qabto kooxda caafimaadkaaga, adoo u isticmaalaya buug-yarahaan sidii hagge ahaan. Buug-yarahaan keligiis looma tixgalin doono talo ahaan. looma isticmaali karo ganacsi ahaan ujeedo. Qiimayn buuxda, fadlan halkaan riix ([rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali](http://rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali))

Dhamaan turjumaadahan waxaa bixiya Translators without Borders' (Turjubaanada bilaa xuduudaah') bulshada turjubaanka. tTayada tarjumaadahaan waxaa loo hubiyaa inay ka dhigayaan tarjumaadaha sida ugu macquulsan, laakiin waxaa jirta halis ah khaladaad iyo marin habaabinta macluumaadka qaar.

## Noo sheeg siday kula tahay

Waxaan soo dhawaynaynaa talooyinka lagu hagaajinayo buug-yarahan. Haddii aad hayso faallo guud, fadlan iimayl ugu soo dir:

 [patientinformation@rcoa.ac.uk](mailto:patientinformation@rcoa.ac.uk)

 020 7092 1500

### Royal College of Anaesthetists

Churchill House, 35 Red Lion Square, London WC1R 4SG

**rcoa.ac.uk**

## Daabacaadda Labaad, Maarsó 2022

Warqadan waxaa dib loo eegi doonaa shan sano gudahood laga bilaabo taariikhda la daabacay.

### 2022 Royal College of Anaesthetists ©

Xaashidan waxa laga yaabaa in loo koobiyeeyo ujeedada soo saarista agabka macluumaadka bukaanka. Fadlan xigo isha asalka ah . Haddii aad rabto inaad qayb ka mid ah buug-yarahaan ku isticmaasho daabacaad kale, waa in la bixiyaa qirasho ku habboon oo laga saaro calaamadaha, astaanta iyo sawirrada. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan nala soo xiriir.



Warqadan waxaa dib u eegay CHANGE People  
[changepeople.org](http://changepeople.org)